

**Isbuuclaha BSD ee Janaayo 11, 2021**

**Wicitaanka- Guriga ee Dugsiga Dhexe ee Conestoga**

Fiiri sida Dugsiga Dhexe ee Conestoga uu u aqoonsado shaqada ardayda iyo shaqaalaha dadaalo, xitaa inta lagu jiro Barashada Fogaanta Dheeriga ah.

<https://youtu.be/VDCtrBAcEfw>

**Clothes Closet hada waxaa la dhahaa Dharka Caruurta!**

(Logo)

Clothes Closet waxaa loo bixiyay magac cusub! Hadda waxaa loo yaqaan Dharka Carruurta. Magacani wuxuu sifiican u matalaa himilada ah bixinta dhar cusub ama waxyar la isticmaalay ee loogu talagalay ardayda u baahan Iskuulada Degmada Beaverton. Waxay aad uga weynt tahay armaajada!

Haddii ardaygaagu u baahan yahay dhar bilaash ah, Dharka Carruurta ayaa diyaar u ah inay kuu adeegaan. Balan ayaa loo baahan yahay. Dharka carruurta ayaa la cusbooneysiisay saacadaha jiilaalka: Talaado 9:30 a.m. - 3 pm, Arbacada 10 am - 6 pm iyo Khamiista 9:30 a.m. - 3 pm.

Si jadwal u sameeysato, fadlan buuxi [Clothes for Kids Appointment form](#) ama wac 503-356-4322. Booqashooyinka ayaa ku kooban hal qof oo weyn oo leh afar carruur ah ama laba qof oo waaweyn oo leh 8 carruur ah. Dhammaan dadka soo booqanaya waa inay xirtaan maaskarada. Haddii aadan lahayn mid kuu gaar ah, mid baa lagu siin doonaa.

Waxaan sidoo kale raadineynaa mutadawiciin Dhar Carruurta. Fadlan kala xiriir Johanna Shrout halkan [johanna\\_shrout@beaverton.k12.or.us](mailto:johanna_shrout@beaverton.k12.or.us).

**Wacitaan Musharxiinta Guddiga Iskuulada Beaverton**

Maajo 18, 2021, codbixiyayaashu waxay dooran doonaan afar xubnood oo ka tirsan Golaha Iskuulada Beaverton illaa 4 sano ah. Musharxiinta waa inay buuxiyaan codsi oo ay ku fayl gareeyaan [Washington County Elections Office](#) inta udhaxeysa Febraayo 6 iyo Maarso 18 markay tahay 5:00 pm. Waqtiga kama dambaysta ah ee lagu xareeyo bayaanka musharnimada ee Buugga Cod-bixiyeyaasha waa 22-ka Maarso saacaddu markay tahay 5:00 galabnimo. (Calaamadaha boostada lama aqbali karo.)

Xilalka banaan:

- [Zone 1](#) – Hadda waxaa haya Susan Greenberg
- [Zone 2](#) - Hadda waxaa haya Anne Bryan
- [Zone 4](#) - Hadda waxaa haya Donna Tyner
- [Zone 5](#) - Hadda waxaa haya LeeAnn Larsen

Waxa laga rabo Musharaxiinta:

- Waa inuu noqdaa cod bixiye diiwaangashan
- Ku noolyahay xuduuda Guddiga Isdkuulka ee ay rabaan inay matalaan
- Ku noolaa Degmada muddo hal sano ah ka hor doorashada
- Aanu aheyn shaqaale ka tirsan Iskuulada Degmada

In kasta oo musharaxiinta laga soo sharaxo Aagga Guddiyada ay ku nool yihiin, haddana dhammaan cod-bixiyeyaasha Degmadu waxay u codeeyaan jagooyinka. Fadlan booqo [School Board webpage](#) wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u aragto khariidadaha aagga. Sidoo kale, fadlan xaqiiji aagga aad degan tahay adoo booqanaya [zone map](#).

Foomamka diiwaangelinta Doorashada Gaarka ah ee Degmooyinka iyo tilmaamaha ayaa laga heli karaa [Washington County website](#). Musharaxiinta sidoo kale waxay ka qaadan karaan foomamka Xafiiska Doorashooyinka County-ga Washington, Suite 170, 2925 NE Aloclek Drive ee Hillsboro. Su'aalaha la xiriira doorashada, fadlan soo wac 503-846-5800.

### **CTE - Waxbarashada Farsamada ee Xirfadeed**

Barnaamijyada CTE waxay ardayda dugsiga sare ka qaybgeliyaan fasalo tayo sare leh, adag oo ku haboon, oo loogu talagalay inay ka caawiso inay damacyadooda u beddelaan mushaar iyo riyadooda shaqooyin. Barnaamijyada CTE waxay iskaashi la yeeshaan ganacsiyada maxalliga ah iyo warshadaha si loo abuuro fursado dhiirrigeliya hal-abuurnimo, hindisaha iyo hoggaaminta, kuwaas oo ku haboon suuqa shaqada ee maanta.

Waxaan aburnay fiidiyowyo taxane ah, oo cinwaankoodu yahay "Grads Talking Shop" si aan u iftiiminno qaar ka mid ah barnaamijyada 32 CTE ee ka socda lixdeena dugsi sare ee dhammaystiran iyo hal dugsi sare oo ikhtiyaar ah. Qeybtan "Grads Talking Shop," waxaan ku sahamin doonnaa adduunka Tikniyoolajiyadda baabuurta iyadoo loo marayo indhaha Kristin Keppner, oo ah arday ka soo qalinjabiyey barnaamijka BHS iyo Auto Tech. inkastuu ku yaalo Aloha High School, barnaamijka CTE Auto Tech waxaa heli karo ardayda ka socota mid ka mid ah dugsiyadeena sare ee dhameystiran. (Gaadiid ayaa la bixiyaa.) Fiiri: <https://youtu.be/ismPibSZDc4>

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada CTE, fadlan booqo bogga la cusbooneysiisay:

<https://www.beaverton.k12.or.us/cte>